



## Liiska hubinta ee Dib ugu noqoshada Dugsiga

Agoosto 29, 2022

Ardayda PPS iyo Qoysaska Qaaliga ah,

Bilawga sanad dugsiyeed kasta oo cusub waxa had iyo jeer lagaa fishaa rajooyin badan iyo farxad. Kooxdayadu waxay ku mashquulsanaayeen qorshaynta xagaaga iyo diyaarinta. Macalimiinta iyo shaqaalahu waxay ka qaybqaateen horumarinta xirfada iyo fursadaha tababarada xagaaga. Inta badan ardaydeenu waxay ku laaban doonaan dhismayaasha cusub ee dhawaan la dhisay ama dayactirka lagu sameeyay... Wuxaanu diyaar u nahay sanad dugsiyeed farxad leh!

Iyadoo ku tala galkayaga aanu diirada ku saarayno [waxbarid tayadeedu-sarayso ee u adeegida sinaanta waxbarashada](#), kani waa sanad xiiso leh oo sii wadi doona in aanu u dhaqaaqno dhanka kaga dhabaynta hiigsegeena (PPS relimagined) iyo u diyaarinta dhamaan ardayda si ay u ogaadaan dhamaan qaybaha kala duwan ee himilooyinkeena qalinjabinta. Mudnaanteena waxbariada waxa ku jira qaab dhismeedka cusub ee waxbarida, la qabsashada manhajka, iyo macalin leh xirfad waxbaris oo la jaanqaadaya is badalka. Wuxaad wax badan ka baran kartaa [websaydkan](#).

Maadaama oo aan kusii dhawaanayno maalintii ugu horaysay ee dugsiga, waxa aanu idinla wadaagaynaa macluumaadka si idinka oo diyaarsan u bilawdaan sanad dugsiyeedka:

### Sanad Dugsiyeedka iyo Xusuusaha Maalinka Koowaad

Salaasa, Agoosto 30'keeda waa maalinta koowaad ee dugsiga ee inta badan ardayda PPS.

- Salaasa, Agoosto 30'keeda - Maalinta koowaad ee dugsiga ee kaliya fasalada 6'aad, 9'aad, iyo 12'aad.
- Arbaca, Agoosto 31'keeda - Maalinta koowaad ee dugsiga ee kaliya fasalada 7'aad, 8'aad, 10'aad iyo 11'aad.
- Salaasa, Sibteembar 6'deeda - Maalinta koowaad ee Xanaanada.
  - Xanaanada caruurtu waxay leedahay korodh inta u dhaxaysa Agoosto 30-Sibteembar 2 halkasoo qoysaska mid walba lagu martiqadi doono isku xidh qof-ka-qof ah oo ay la yeeshaan macalinkooda Xanaanada mid kasta oo ardayda ka mid ahna waxa lagu martiqadi doonaa maalin tababar fasalkooda gudhihiisa.
- Isniin, Sibteembar 12'keeda - Maalinta Koowaad ee loogu tala galay Xanaanada-Ka hor iyo Head Start.



Halkan waxaad ka helaysaa liinkiga [Jadwalka PPS 2022-23](#).

### Cuntada

Iyadoo Kongareeska Maraykanku aanu u fidin dhamaan cuntooyinka bilaashka sanad dugsiyeedkan ardayda oo dhan, waxaanu awoodnay in aanu helno 53 dugsi yo barnaamij loo ogolaaday inay yihiin Community Eligibility Provision (CEP).

PPS waxay awoodi doontaa inay bixiso quraac iyo qado bilaash ah maalin walba ee arday kasta oo ka diiwan gashan goobahan iyadoon loo baahnayn inay buuxiyaan waraaqo. Waxed halkan ka arki kartaa liistada oo dhamaystiran ee dugsiyada la ogolyahay [halkan](#).

Kuwa aan dhigan 53 dugsi ee ka qayb qaadanaya CEP, caruurtaadu waxay u qalmi karaan cunto bilaash ama cunto qiimaheeda la dhimay. Guji [halkan](#) si aad u gasho 2022-23 Codsiga Qarsoodiga ah ee Qoyska oo loogu tala talay Cuntooyinka Bilaashka ah iyo Cuntooyinka Qiimahooda La dhimay.

### Basaska

Hadii ardaygaagu u qalmo adeega baska, fadlan hubi inaad ogaato meesha baskaagu istaago iyo jadwalka. Kooxda gaadiidku waxay sameeyeen <https://www.pps.net/Page/179bogan>oo adiga laguugu tala galay si aad uga hesho khadadka basaska. Waxe sidoo kale aad booqan kartaa[https://www.pps.net/Page/176bogeena\\_Gaadiidka\\_ee\\_Su'aalaha\\_Inta\\_bada\\_La-iswaydiyo](https://www.pps.net/Page/176bogeena_Gaadiidka_ee_Su'aalaha_Inta_bada_La-iswaydiyo).

Hadii aad leedahay arday leh IEP ama adeeg gaadiid oo gaar ah, fadlan lasoo xiriir [transportation@pps.net](mailto:transportation@pps.net).

### Caafimaad Qabka Maskaxda - Agabyada la Heli karo

Waxaanu danaynaa fayoobida ardaydayada. Waxe jira dad iyo ururo bulsho oo caawin kara adiga iyo qoyskaaga. Isku xidh mid ka mida taageerooyinka liistigan ku qoran<https://www.pps.net/Page/19757halkan> iyo/ama la wadaag walaacaaga bixiyahaaga caafimaadka.

### Aaladaha Dhijitaalka ah ee Ardayga

Arday kasta oo PPS ah ee fasalada sadex ilaa laba iyo tobantoban wuxuu isticmaali karaa aalad bilaash ah si uu u helo manhajka dhijitaalka ah iyo agabyada onlaynka ah. Hadii ardaygaagu u baahdo qalab/aalad, fadlan la soo xidhiidh dugsigaaga. Waxaa lagaaga baahan doonaa in aad saxiixdo Heshiiska Istimcaalka oo aad qirayso inaad heshay aalad.

Fadlan xasuusnow in PPS ay meesha ka saarayso khidmada is-caymiska- \$20 taasoo ay hore ugu dhawaaqueen bulshooyinka dugsiyadu. Qoysaska lama waydiin doono loogamana baahna inay bixiyaan khidmadan qoysaska bixiyay khidmadana waa loo celin doonaa. Iyadoo ay ku xidhantahay qaabka loo bixiyay ayaa la go'aamin doonaa qaabka loo celinayo; markaa



dugsigeena iyo kooxaha dagmadu waxay si dadaal leh uga shaqayn doonaan qabashada hawsha dhawrka usbuuc ee soo socda. Fadlan iska ilaw qaybta foomka hada ee ka hadlaysa bixinta iyo dayactirada inta aanu ka shaqaynayno in aanu cusboonaysiino foomka. Waxa aanu si wayn u qadarinaynaa dulqaadkaaga iyo fahankaaga.

**Miyaad u baahantahay caawimaad dhanka luuqadaada hooyo?**

[PPS Qoyska Khadka Luuqadaha Badan](#) waa adeeg loogu tala galay waalidka ama masuulka (ee dhamaan luuqadaha ay bixiso PPS) si loogula soo xidhiidho dugsiga ee arimaha la xidhiidha cuntooyinka, caawinta tiknoolajiyada ee fasalada onlaynka ah, waxbarida gaarka ah, la hadlida macalinkaaga, agabyada COVID iyo maclumaadka kale, iwm. Miyaad u baahantahay caawimaad? Naga soo wac:

- Español: 503-916-3582
- 中文 : 503-916-3585
- Tiếng Việt: 503-916-3584
- Soomaali: 503-916-3586
- Русский: 503-916-3583

Waxaan rajaynayaa inaad qaadan doonto faa'idooyinka agabyadan. Waxaan kuu raiaynaynaa sanad dugsiyeed guul leh.

Dr. Cheryl Proctor

Ku-xigeenka Kormeeraha guud, Waxbarashada & Bulshooyinka Dugsiga